

Ujeedooyinka Be@School

Hadafka Be@School waa inuu wax ka qabto caqabadaha hor istaagan tegitaanka dugsiga ee ardayda fasalada K-12 ee Degmada Hennepin iyo qoysaskooda si xilli hore looga hortago taasoo ku saleysan wada shaqeynta qoyska iyo dugsiga.

Waxyaabaha Ay Aaminsan yihiin

Ka Wada
Shaqeynta U
Sinaashaha
Waxbarashad
a
Ixtiraam, Iskula
xisaabtanka xiriirka

Be@School waa barnamij adeeg dadweynaha ah oo uu maamulo Xafiska Xeer Ilaalinta Degmada Hennepin, kaasoo taageera ardayda iyo qoysaskooda si loo kordhiyo tegitaanka dugsiga. Barnamijkeenu waxa uu caawiyaa qoysaska iyada oo uu ogaanayo caqabadaha maalin kasta hor taagan ee tegitaanka dugsiyada una fidiya sidii wax looga qaban lahaa caqabadahaas. Be@School waxa uu ku dadaalaa in aysan qoysasku u gudbin nidaamka maxkamadaha.

**Haddii uu qoyskaagu
caawinaad u baahan
yahay, la soo xiriir
Be@School:**

**Telefoonka: 612-348-6041
Iimeylka: Be.at.school@hennepin.us
Bogga: www.be-at-school.org**



www.be-at-school.org

Be@School

www.be-at-school.org » (612) 348-6041

Qof kasta door ayuu ku leeyahay caawinta ardayda si ay u helaan tayo waxbarasho leh.

Doorka Qoyska

Ardaygaaga kala hadal dugsiga iyo waxbarashada. Ku dadaal in ardaygu fahmo muhimadda ay leedahay waxbarashada kana ogoow sida uu dareemayo.

La socodsii dugsiga haddii uu ilmahaagu ka maqnaanayo dugsiga sabab kasta.

La soco sharciyada u degsan dugsiga ee maqnaashaha ardayga ah.

La soco tegitaanka dugsiga ee ardaygaaga. Inta badan waxa aad kala socon kartaa barta internetka.

Diyaari hab kale oo ilmahaagu dugsiga ku tegi karo haddii wax kugu soo kordhaan.

La soco madax xanuunka ama calool xanuunka inuu calaamad u yahay walwal ilmaha haya ama xanuun jirka ah. La socodsii dhakhtarka iyo kalkaaliyaha caafimaadka si ay go'aan uga gaaraan in ilmaha guriga joogo halkii uu dugsiga tegi lahaa.

U xadid ilmaha waqtiga uu seexanayo, ku ciyaarayo kombiyuutarka ama isticmaalayo telefoonka.

Caawinaad weydiiso haddii aad dooneyso in lagu taageero. Shaqaalaha dugsiga, hay'adaha bulshada, iyo xubnaha kale ee bulshada ayaa ku caawinaya.

Xaqiiji in ardaygaagu si joogta ah u tago dugsiga.

Doorka Dugsiga

In ay hayaan diiwaanka saxa ah ee tegitaanka dugsiga.

In ay waalidiinta/mas'uulka ilmaha iyo ardayga la socodsiiyaan tegitaanka dugsiga.

In uu diyaariyo barnaamij/jadwal ku haboon baahida ardayga.

Inuu wax ka qabto caqabadaha ardayga ka hortaagan waxbarashada.

Waxbarashada waa aasaaska in qofku nolosha ku guuleysto.

Doorka Be@School

Gaarsiinta macluumaadka qoysaska ee la xiriira sharciyada waxbarashada.

Qoysaska oo loo soo bandhigo caawinaad iyada oo badbaadada caruurta iyo maxkamaduhu aysan soo faragelin.

Qoysaska iyo dugsiyada oo laga caawiyo in ay aqoonsadaan caqabadaha ardayda ka hor taagan tegitaanka dugsiyada.

In loo fidiyo adeegga ay u baahan yihiin si wax looga qabto caqabadaha hor taagan ee tegitaanka dugsiyada.

